



Marka loo eego Nidaamka Badbaadinta, waalidiinta waxay leeyihiiin xuquuqyada soo socota ee waxbarashada gaarka ah:

OGGOLAANSHAHAA WAALIDKA

- ✓ Oggolaanshaha waalidka ayaa loo baahan yahay si loo bilaabo qiimeyeenta hore ee waxbarashada gaarka ah.
- ✓ Oggolaanshaha waalidka ayaa loo baahan yahay si loo bilaabo adeegyada waxbarashada gaarka ah.
- ✓ Waalidiintu way diidi karaan qalqaalooyinka degmada
- ✓ Waalidiintu way ka noqon karaan oggolaanshaha adeegyada waxbarashada gaarka ah

DIIWAANKA ARDAYDA & XOGTA

- ✓ Dugsiyada waxay ilaaliyaan asturnaanta ardayda iyo diiwaanada sirta ah
- ✓ Waalidku wuxuu codsan karaa diiwaanada waxbarashada waqtii kasta
- ✓ Oggolaanshaha waalidka ayaa loo baahan yahay si loo sii daayo diiwaanada waxbarashada
- ✓ U wareejinta xuquuqda ardayda markay 18 jirsadaan

NIDAAMKA KHILAFAAADKA

- ✓ **WAALIDIINTA WAYNA DIIDI KARAAN DUGSIGA DEGMADA WAYNA CODSAN KARAAN....**
- ✓ kulan kale oo IEP ah haddii ay diidaan soo jeedinta degmada
- ✓ Qiimeyn Waxbarasho oo Madaxbanaan
- ✓ Shirka heshiisiinta ee dugsiga si loo xaliyo khilaafaadka
- ✓ **Dhex dhexaad** la kulan dhexdhexadiye dhexdhexaad ah si loo xaliyo shirka
- ✓ **Waxaa Fududeeyey** Shirka IEP oo uu hogaminayo qof dhexdhexaad ah oo MOE u xilsaartay
- ✓ **U fayl garee cabasho** Waaxda Waxbarashada ee Minnesota
- ✓ **Dhageysiga nidaamka cadaalada** oo uu weheliyo garsoore maamul

DUKUMINTIGA NIDAAMKA SHARCI

- ✓ Waalidiintu waa inay helaan ugu yaraan hal mar sanadkii
- ✓ Waalidiintu waa inay helaan Prior Written Notice (PWN) - Ogeysiiska Qoraalka Hore) ee sharaxaya soo jeedimaha degmada
- ✓ Waalidiintu waxay haystaan 14 maalmood oo taariikhi ah inay kaga soo jawaabaan Ogaysiiska Qoraal Hore ah
- ✓ Waxaa jira ogolaansho maldahan kadib 14 maalmood taariikheed ee helitaanka Ogaysiiska Qoraalka Hore

WIXII SU'AALO AMA WALAAC DHEER AH, FADLAN LA XIRIIR:

MN Department of Education (MDE)- (Waaxda MN ee Waxbarashada)	PACER	ARC Minnesota	Naafada Minnesota Xarunta Sharciga
www.education.state.mn.us 651-582-8689	www.pacer.org 952-838-9000	www.thearcofminnesota.org 651-523-0823	www.mndlc.org 612-334-5970